


# Furitaanka Liiska Sugayaasha Guryaynta!



## Liiska sugtayaasha guryaha dadka danyarta ah ee Tacoma Waa uu furan Yahay

**Nofeembar 15-Diseembar 3, 2021**

Maamulka Guryaynta Tacoma waxay kusoo casuumayaan dadka u qalma inay dalbadaan barnaamijkeeda guryaha qiimaha jaban. Waxaan bixinaa labo nooc oo ah caawimadaha waawayn ee guriyeynta: dhismooyin qiimo jaban oo kiro ah, ama kaarka foorjarka oo kaa caawinaaya inaad bixiso kirada Tacoma. Waxaan aqbali doonaa arjiga laga bilaabo:

**8am Isniinta, Nofeembar 15 illaa 5pm Jimcaha, Diseembar 3, 2021.**

**Fursadaan furan waxaa loogu talagalay qoysaska tiradoodu dhan tahay 9-10 qof**

**Waxaad aad u Baahan Tahay Si Aad U Dalbato:**

- Magacaaga oo saddexan iyo macluumaadka aasaasiga ah ee dhamaan xubnaha qoyskaaga
- Cinwaan iimeel oo shaqaynaya
- Dakhliga sanadkii ee qoyska oo dhan
- Lambarka Amniga Qaran ee dadka waawayn ee jira (18 ama kasii wayn) kuwaas oo leh

Waxaad ka samaysan kartaa iimeel gmail.com ama outlook.com.

**Ka codso:**

**[Tacomahousing.org/waitlist](https://tacomahousing.org/waitlist)**



Igu sawir kaameeradaada taleefanka ama Ab-ka Koodhka QR

# Su'aalaha Inta badan La iswaydiiyo

## Ma u Qalmaa Inaan Codsado?

Qoysku waa inuu ka kooban yahay sagaal ama toban qof si ay ugu qalmaan inay codsadaan liisnaan sugitaanka.

## Maxay tahay sababta liisnaan sugitaanka ay ugu qalmi karaan kaliya qoysaska ka kooban sagaal ama toban qof?

Liiskeena dadka sugayaasha wakhtigani waxa uu leeyahay qoysas fardo badan oo aad u tiro yar oo weli sugaya. Liiskeena sugitaanka waxaa fursadoodu badan tahay qoysaska balaadhan, taasina waa sababta aanu ugu furnay qoysaska ka kooban sagaal ama toban qof.

## Ma inaan deganahaybaa Tacoma si aan u codsado?

Maya

## Goorma iyo sideen u dalban karaa?

Sababo la xariira xadidaada korona fayraska, ma aqbali doono waqti xaadirkaan dadka sida tooska ah codsigooda u keenaya. Waxaa jira labo qaab oo loo codsado:

1. Oonleen - Ka codso oonleena adoo gelaaaya [Tacomahousing.org/waitlist](https://www.tacomahousing.org/waitlist). Tani waa dariiqa ugu dhakhsaha badan ee ugu wanaagsan ee lagu dalban karo.
2. Taleefan - Wac (253) 448-2738, Isniinta-Jimcaha, 9 ka subaxnimo – 4 ta galabnimo

Waa inaad dalbataa inta u dhaxaysa **8da subaxnimo Isniinta, Nofeembar 15 keeda ilaa 5ta galabnimo, Jimcaha, Diseembar 3, 2021.**

Mar kasta oo aad dalbato wakhtigan ma saamaynayso fursadaada.

## Ma dalban karaa wax ka badan hal mar muddadaan arjiga?

Maya, marka aad dalbato, waxaan kaa codsanaynaa inaad ku qorto qof walba oo qoyskaaga katirsan. Qof kasta oo liiska kujira ma dalban karo liisnaan sugayaasha mar kale. Hadii aad gelin liiskaayaga dadka ee sugayaasha wakhtigaan, waxaad isku dayi kartaa mar kale marka uu furmo liiska dadka sugayaasha.

## Sidee ayaan ku ogaanayaa inaad hesheen arjigayga?

Hadii aad oonleena ahaan ku dalbatay, waxaad heli doontaa lambarka cadaynta. Waxaa sidoo kale lagu soo diri doonaa iimeel uu la socdo arjiga la buuxinayo.

## Goorma ayaad igu soo warcelinaysaan?

Bakhtiyaa nasiibku wuxuu dooran doonaa qiyaastii illaa 50 qoys oo kujira liiska sugitaanka. Taasi waa tirada aanu u adeegi karno ilaa labaadii sano. Waxaanu liiska sugitaanka u gelin doonaa una kala horeysiin doonaa qaab nasiib ah. Laga bilaabo Diseembar 20 keeda, waxaanu la xidhiidhi doonaa dalbadayaasha oo waxaanu u sheegi doonaa hadii ay kusoo baxeen liiska sugayaasha iyo hadii kale.

## Hadii aan galo liiska sugayaasha, maxaa xiga?

Hadii bakhtiyaa nasiibku uu ku geliyo liiska dadka sugayaasha ah, waxaa laguusoo diri doonaa lambarka diiwaankaaga. Marka magacaagu ugu soo sarmaro liiska, waxaanu eegi doonaa oo aan xaqiijin doonaa inaad u qalanto. Hal shardi, iyo kuwa kale oo ku lamaan, waa in qoyska dakhligiisa sanadkii uu noqdo xadi ka yar:

### Tirada Dadka Qoyskaaga

1-8 Uma qalmo	9 \$101,750	10 \$107,550	11+ Uma qalmo
------------------	----------------	-----------------	------------------

Hadii aad u qalanto, waxaanu ku siin doonaa ikhtiyaarka guryayntaayada la heli karo ee koowaad. Waxa ay noqon kartaa taasi:

1. Guri ku yaal mid kamid ah hantideena. Hadii ay taasi dhacdo, waa in aad aqbashaa meesha aanu ku siinay hadii ayna jirin sabab wanaagsan oo aad ku diidayso.
2. Waxaanu kuusoo bandhigaynaa inaan kaa bixino kirada Tacoma. Adiga ayaa dooranaya meesha aad ku noolaanayso.

## Goorma ayaan aqbalaynaa arjiyada mar kale?

Waxay u badan tahay in aanu aqbali doono arjiyada ilaa laba sano kadib. Waxaanu sugi doonaa ilaa liiska dadka sugayaashii ay soo yaraadaan kahor inta aanaan dad dheeraad ah ku darin. Booqo [tacomahousing.org/notifyme](https://www.tacomahousing.org/notifyme) oo is diiwaan geli si aad u hesho iimeel marka liiska dadka sugayaasha ah dib loo furo.

## Xog badan Ka Baro: [Tacomahousing.org/WaitlistFAQ](https://www.tacomahousing.org/WaitlistFAQ)